CARRUURTAADA. FURSADIHIINNA

INAAD WAALID KU NOQOTO DANMARK

Khadija Y. H. Abdi waa kaaliye bulsheed iyo caafimaad, waxana ay hooyo u tahay saddex carruur ah. Waxay ku dhalatay Soomaaliya, waxana ay Danmark timi, iyadoo 35 jir ah. Khadiija waxay xubin ka tahay guddida waalidka ay dhigato gabadheedu, waxana ay asaastay urur dumareed.

CARRUURTAADA. FURSADIHIINNA

INAAD WAALID KU NOQOTO DANMARK

Waalidka oo dhan ayaa jecel, inay carruurtoodu si fiican u koraan oo guulaystaan. Carruurta waa lagu farxaa oo loo han waynaadaa, waana laga werweraa sidoo kale:

Ma helayaan carruurtadyu wax-barasho iyo shaqo? Ma guursan doonaa weligood? Ma yeelan doonaa carruur aan awow ama ayeeyo u ahay? Ma xejin doonaan dhaqanka iyo qiyammada qoyskayaga? Ma noqon doonaa dad faraxsan?

Waalid ahaan waa inaad u carbisaa carruurtaada, inay waajahaan dunida. Waa inaad u yeeshaa caabbi iyo xoog, si ay uga faaidaystaan fursadahooda dhallinyaro ahaaneed ee Danmark.

Haddii qofka laftiisu aanu ku korin Danmark, waxa laga yaabaa, in dhibaatooyin ka hor yimaaddaan.

Waxa laga yaabaa, inay fursaduhu u wada muuqan waayaan, oo carruurta uu ku hagi kari waayo jidka toosan.

Dhakhtarka cilminafsiga Basim Osman ayaa yidhi: ”dhibaatada ugu wayn ee waalidka ka hor imanaysaa waxay tahay, inuu sameeyo xidhiidhka guriga iyo debeddiisa”. Sida ugu fiican ee carruurta loo caawin karaana waxay tahay, in lagu taageero sidii caadooyinka iyo qiyammada qoyska loola midayn lahaa bulshada deen-ishka.

Dhibaatadaas wuu garanayaa Walid El Jamal: ”carruurtayadu waa inay maarayn karaan laba dhaqan. Had-dii waalid ahaan aynaan waxba ka garanayn bulshada, ama ku dhex lunnay, markaas jidka ma tusi karno carruurteenna ”.

Markaad carruurtaada tusayso jidka toosan, waxa ku hor imanaya suaalo badan:

Maxaa ii muhiim ah, si carruurtaydu u bartaan dhaqanka qoyska?

Sidee ayaan ugula talin karaa carruurtayda mustaqbal fiican?

Xadkee ayaa macquul ah, oo aan u dhigaa carruurta waalid ahaan?

Sidee ayaan u caawin karaa carruurtayda, kol haddii aanan dhallinyarimadii ku soo korin Danmark?

Waa shaqadiinna, hooyo iyo aabbo ahaan, inaad carruurta kalsooni gelisaan. Inaad ku caawisaan, siday nolosha u sii wadi lahaayeen. Inaad ka caawisaan, siday jawaabo ugu heli lahaayeen suaalaha yaryar iyo kuwa waawaynba. Inaad ka caawisaan, siday u noqon lahaayeen dhallinyaro ku nool laba dhaqan.

Fursadaha carruurtiinnu waa hodan. Kani waa tilmaame ku siin kara ilhaam iyo talobixin, si aad uga caawiso, inay ka faaidaystaan fursaadahooda badan ay ku leeyihiin bulshada deenishka.

Walid El Jamal wuxu leeyahay ganacsi madaxbannaan, wuxu dhalay saddex carruur ah. Wuxu ku dhashay Bairut, labadiisa waalid waa Falastiin, waxana uu Danmark yimi, isagoo 20 jir ah. Walid wuxu xubin ka ahaa guddida qalabixinta, xilliga firaaqadana wuxu dhigaa qoobkaciyaarka carabta.

Khabiir:
Basim Osman waa dhakhtar ku takhasusay cilmi nafsiga, wuxu aabbo u yahay saddex carruur ah. Asal ahaan wuxu ka soo jeedaa dalka Sudan, intu noolaa se wuxu deggenaa Danmark. Basim wuxu sannado badan ka shaqaynayay carruurta, dhallinyarada iyo dadka waawayn ee asal ahaan ka soo jeeda qolyaha laga tirada badan yahay.

CARRUURTA & BARBAARINTA

Korintu waxay ka dhigan tahay horumarin iyo saamayn. Waalid ahaan waxaad korisaa carruurtaada, adigoo bara xeerarka iyo xuduudaha, iyo adiga oo jeclaada oo kalsooni geliya. Carruurta oo dhammi waxay qaadaan tallaabada waalidkood: haddaad daacad tahay, iyaguna daacad ayay noqonayaan. Markaad la hadlayso, iyaguna sidoo kale way kula hadlayaan. Markaad tusto kalsooni iyo maamuus, iyaguna sidoo kale waxay ku tusayaan kalsooni iyo maamuus. Waa adiga hormoodka ugu muhiimsan ee ay higsanayaan.

Waalidka oo dhammi waxay rabaan, inay carruurtooda u qabtaan waxa u fiican. Laakiin waa in la garto, wuxu yahay waxa u fiicani: ilaa goorm ayaa loo oggolaadaa, inay debedda joogaan dugsiga dabadii? Yay la saaxiibayaan? Ma loo oggolaadaa, inay yeeshaan saaxiib jacayl?

WADAHADAL MISE CIQAAB?
Dhakhtarka ku takhasusay cilminafsiga ee Basim Osman wuxu la kulmay waalid badan, oo ka werwersan carruurtooda dhallinyarada ah. Wuxu qabaa, inay muhiim tahay, inay waalidku isku dayaan inay fahmaan, siday dhallinyaradu u arkaan dunida. In la wada hadlo ayaa keenta inay is fahmaan waalidka iyo dhallinyarada:

”Wada hadalku waa qalabka ugu fiican ee korinta carruurta, waana ka ugu adag sidoo kale.”

Xuquuqda aad u leedahay in lagu caawiyo…

Dawladda hoose waa inay qoyska oo dhan ugu deeqdaa talobixin bilaash ah, oo ay siiso daryeele caafimaad (sundhedsplejerske). Daryeelaha caafimaadku waxay kaa caawin kartaa suaalaha la xidhiidha caafimaadka iyo barbaarinta caafimaadka. Boqolkiiba 99 waalidku way soo dhaweeyaan, inay soo booqato daryeelada caafimaadku.

Walid El Jamal: ”Wadahadalku ma fududa oo wuxu u baahan yahay, inaan garanayo dunida ilmahayga. Lama ciyaaro wiilkayga World of Warcraft, kamana helo Lady Gaga, laakiin waa ogahay inay jiraan. Carruurtaydu waan inay dareemaan, inaan garanayo waxa socda. Si fiican ayaan u la hadli karaa carruurtayda, haddaan ogahay waxa ka socda bulshada ay qaybta ka yihiin.

Waayoaragnimada Basim Osman ayaa tilmaamaysa, in wadahadalku ka dhex abuuro kalsooni waalidka iyo carruurta. Wuxu abuurayaa maamuus. Haddii carruurta la ciqaabo, markay qalad sameeyaan, markaas way baqanayaan. Cabsiduna waxay ku kellifaysa been.

DAACADNIMO

Xuduudaha loo sameeyo ilmaha, marka la korinayo, aya abuura kalsooni. Laakiin waxa muhiim ah in carruurtaadu fahanto xuduudaha. Waa muhiim, inaad waalid ahaan daacad ka noqoto xuduudaha. Haddii carruurtaadu kugu kalsoonaadaan kuna dhiirradaan, inay suaalo ku waydiiyaan, waxay markaas ku dhiirranayaan, inay runta kuu sheegaan. Dabadeedna waad ku kalsoonaan kartaa.

Basim Osman ayaa yidhi: ”Haddii carruurtu garanayaan in la ciqaabayo, haddii ay runta sheegaan, markaas daacad u noqon maayaan waalidkood. Haddii wadahadalku meesha ka baxo, dhallinyarada qaarkood ayaa yeelanaya laba nololood, iyadoo waalidku aanay garanayn waxa ay ku jiraan.”

Muxuu dhigayaa sharcigu?

Dumark iyo raggu way siman yihiin, si simanna waa in loola dhaqmo

Carruurta iyo dhallintu waxay xaq u leeyihiin, in dawladda hoose caawiso, haddii aanu fiicnayn xaalkoodu

Carruurta iyo dhallinta lama oggola in la qasbo ama lala dagaallamo

Carruurta iyo dhallintu waxay xaq u leeyihiin in lala hadlo lana dhegaysto

Ma og tahay in…

…carruurta soo martay xarumaha dharaartii lagu hayo carruurtu kaga fiican yihiin dugsiga asaasiga ah iyo waxbarashooyinka dhallinyarada kuwa kale

…carruurtu ku fiicnaadaan luqadda markay tagaan xarumaha abaydinka iyo xannaanada

…ay badato saamaynta togan ee carruurta tagta xarumaha dharaartii lagu hayo carruurtu, marka barbaariyayaasha iyo waalidku wada shaqeeyaan

… baadhitaanno badani muujiyeen, in wadahadalku yahay qalabka ugu fiican barbaarinta

Khabiir:
Amneh Hawwa waa dhakhtarad ku takhasustay dawooyinka caadiga ah, aqoonta jinsiga iyo cudurrada dumarka, waxana ay dhashay afar carruur ah. Waxay ku dhalay Falastin, Danmarkna waxay timi iyadoo 20 jir ah. Amneh waxay sannado badan kala talinaysay qolyaha laga tirada badan yahay waxyaabo ay ka mid yihiin caafimaadka iyo arrimaha jinsiga.

NOLOSHA QOYSKA

Dhibaato wayn ayay ku noqon kartaa waalidka ku nool labada dhaqan, inay maareeyaan nolosha qoyska. Waxa jiri kara xeerar badan oo kala duwan, dad badanina waxay ka shakisan yihiin:

Ma Danmark ayaynnu joogaynaa, mise dalkii ayaynnu ku laabanaynaa?

Ma isku si baa loo korinayaa wiilasha iyo gabdhaha, mise wiilashu way ka xorriyad badanayaan gabdhaha?

Waa maxay kaalinta aan ku leeyahay doorashada carruurtayda ee cidda ay guursanayaan? Jacaylka, dhaqanka, jinsiyadda, diinta?

Waa maxay ahmiyadda ay ii leedahay, in inantaydu bikrad ahaato, marka la guursanayo, dadka kale se ahmiyad intee le'eg ayay u leedahay?

2 TALO OO FIICAN OO HORSEEDAYA ISLA JAANQAADKA NOLOSHA QOYSKA

Naftaada ku kalsoonow: Dad badan aad garanayso ayaa fikrado ka qaba, waxa u wanaagsan carruurtaada. Laakiin waalid ahaan waa adiga, qofka ka masuulka ah ilmaha. Sidaas awgeed: Dhegayso waxay u baahan yihiin carruurtaadu halkii aad ka dhegaysan lahayd dadka kale fikrad-dooda. Ku kalsoonow, in adiga iyo carruurtaadu aad heli kartaan jidka saxa ah:
Caddee xaaladda joogitaankaaga Danmark: Waalid badan ayaa raba, inay u guuraan dalkoodii hooyo. Walid El Jamal ayaa yidhi: "waa in aynnu goaansanno, waxa aynnu ka qabanayno Danmark – taasi waxay carruurteenna ka caawinaysaa, inay dareemaan kalsooni. Haddii aanay dareemin, in Danmark tahay dalkoodii, markaas dhibaato ayay samaynayaan." Goaan la'aanta waalidku waxay saamaysaa carruurta, oo ma dareemaan, inay dalkan leeyihiin. Kızlar ve erkekler.

HABLAHA IYO WIILASHA

Badanaa waxa jira dhaqan siyaabo kala duwan loola dhaqmo hablaha iyo inamada. Waalid badan ayaa inamada u oggolaada, inay taladooda goostaan, halka hablaha aan laga siin xorriyad badan. Laakiin wiilka qudhiisu wuxu u baahan yahay badbaado iyo xuduudo uu ku koobnaado, si aanu u gelin dhibaato, iyo si uu mustaqbalku ugu caddaado hadday tahay waxbarasho, shaqo iyo qoyska intaba. Habluhuna sidoo kale waxay u baahan yihiin xorriyad, si ay u noqdaan kuwo adag oo isku finaada oo is debberi kara.

Amneh Hawaa ayaa tidhi: "Habluhu aad ayay xarfaan u yihiin, fursado badanna way leeyihiin. Socon mayso inay ilaaliyaan oo kantaroolaan wiilashu. In wiilashu noqdaan bilays. Taasi way ku adag tahay hablaha iyo wiilashaba."

Muxuu dhigayaa sharcigu?

Markay dhallinyaradu gaadhaan 18 jir, waxa loo oggolaanayaa:

Inay goaansadaan halka ay deggayaan

Inay goaansadaan diinta ay qaadanayaan

Inay goaansadaan inay guursanayaan

Inay ilmo iska soo ridaan waalidka oo aan lala socodsiin

Ma og tahay in…

… in dumarka carruurta iska soo rida ee ajinebiga ahi ka tiro badan yihiin dumarka deenishka ah

...in hablaha dhallinyarada ah ee ajinebiga ahi uga nugul yihiin uurka iyo ka hortaggiisa dhallinta kale

...in ilaa afar sano qofka la xidhi karo, hadduu qof kale ku qasbo guur

...in dhallinyaro badan oo ajinebi ahi la sugaan carruurta inay dhalaan ka dib markay dhammeeyaan waxbarashada

GUURKA IYO FURITAANKA

Waxa laga yaabaa inay adag tahay, inaad ilmahaaga sii dayso oo ku kalsoonaato, inuu isagu soo helo qofka ugu fiican uu guursanayo. Laakiin haddii ilmaha si fiican loo soo koriyay, goaanno fiican ayuu qaadanayaa. Amneh Hawaa waxay tidhi: ”Waxaad ku caawin kartaan, inuu lammaane fiican helo, marka aad ka caawisaan, inuu laftiisa ilaaliyo”

Danmark qofku isaga ayaa doorta, inuu guur rabo iyo cidda uu guursanayo. Waxa kaloo jirta, in cid Kastaa xaq u leedahay furitaanka. Amneh Hawaa ayaa tidhi:

”Marka waalidku ku cadaadiyo ilmahoodu inuu guursado, wuxu noqdaa guur aan farxad lahayn, dabadeed way kala tagaan. Waxa laga yaabaa in berigii hore guurkaasi iska jiitami jiray, laakiin taas macnaheedu maaha farxad ayaa jirtay. Waxa laga yaabaa, inuu u jiitamayay fursadaha oo yaraa dartood. Laakiin Danamark waxa yaal fursadihii, oo sidaas awgeed waa la kala tegayaa.

”ANIGU WAXAAN GARANAYAY UUN: DUGSI HOOSE/DHEXE, DUGSI SARE, JAAMACAD – DHAMMAAD!”

ABBO AYAA KA WARRAMAY KU CADAADINTA WIILKIISA EE WAXBARASHO GAAR AH – IYO INUU EEDDA IYO CAWAAQIBKII KA DHASHAY QAADAY MARKII DANBE.

”Weligay waxaan rabay, inay carruurtaydu gaadhaan heer ka sarreeya kayga. Sidaas awgeed waxaan sameeyay si kastoo wiilkayga wayni ku geli lahaa dugsiga sare. Yoolkaygu wuxu ahaa inuu jaamacad galo, laakiin isagu ma rabin. Sidoo kale ma rabin dugsiga sare ee ganacsiga, laakiin aniga waxa kale qiimo ila ma lahayn. Aad ayaan culays u saaray. Waxan ku idhi: ”Maya, dugsiga sare ayaa kuu fiican. Waa furihii jaamacadda.” Qiimo badan ayay taasi igu kacday, eed badanna waan xanbaarsan ahay, waayo maan caawin wiilkayga. Aqoon u maan lahayn waxbarashooyinka. Waxa aan garanayay uun – dugsi hoose/dhexe, dugsi sare, jaamacad, dhammaad. Aqoon u ma lahayn fursadaha jira. Maan maqlin wuxu rabay wiilku, iimana muuqan wuxu awood u lahaa. Aniga awgay ayuu u galay dugsiga sare. Dabadeed waxbarashooyin kala duwan ayuu ku qaatay jaamacadda, laakiin kuma uu faraxsanayn. Awood badan ayuu ku bixiyay, si aan ugu han waynaado, laakiin kuma uu faraxsanayn waxbarashada uu qaatay. waxay ahayd bilaw qaldan, maantana ma lihin xidhiidh fiican. Wuxu igu canaantaa farxad la’aantiisa. Laakiin waxa maskaxdyda ku jirtay: ”inaan dalkaygii uga soo guuray, si aan carruurtayda ugu suurtageliyo fursado fiican.” Waxaan moodayay, inuu ku farxi doono, hadduu galo jaamacadda, laakiin Danmark waxa jira fursado waxbarasheed oo badan oo kale. Hadda ayaan garanayaa, laakiin markaas maan garanayn nidaanmka waxbarashada, waxaan ixtiraamayay keli ah waxbarashooyinkii aan ku iqiin dalkaygii. Laakiin carruurtayda yaryari aad ayay uga duwanaayeen sidaas. Iyaga qudhooda ayaa doortay waxbarashooda. Midi waa fannaanad jilaa ah, mana ahayn taasi waxbarasho aan dooran lahaa. Laakiin waxa ii muuqata, inay ku faraxsan tahay, oo heshay jidkii saxa ahaa, taasna waan ku han waynahay.

Khabiir:
Meliha Saglanmak waa macallin wax ka dhigta dugsiga hoose/dhexe, waxay dhashay saddex carruur ah. Waxay ku dhalatay dalka Turkiga, Danmarkna waxay timi, iyadoo 17 jir ah. Meliha waxay ka shaqaynaysay dugsiyada hoose/dhexe ee deenishka 25 sano, waxana ay dhigtaa afka deenishka oo luqad labaad ah.

WAXBARASHADA

Muxuu dhigayaa sharcigu?

Carruurta iyo dhallinyaradu waxay xaq u leeyihiin waxbarasho

Waxbarashadu waa qasab Danmark, taasi waxay ka dhigan tahay, waa in carruurta oo dhammi leeyihiin waxbarasho u dhiganta dugsiga hoose/dhexe

Waalid ahaan waxaad xaq u leedahay, inaad la xidhiidho macallimiinta, maamulaha iyo guddida dugsiga

Waalid ahaan waxaad iskaashi kala samayn kartaa dugsiga, sidu wax u baranayo ilmahaagu

Ma ogatahay in…

…dhallinta ka qaybqaadata hawlgallada bulsheed ee waxbarashadu, ku wacnaadaan waxbarashada

…in wiilasha ajinebiga ahi ugu badan yihiin ka tegista waxbarashooyinka dhallinyarada

…filashada wiilka laga sugayo inuu reerka xilqaado ay ka kaxayso waxbarashada iyo kariyarka

…kaalinta hablaha ajinebiga ah ee ku jira nidaamku waxbarashadu ka badanayo dhallinyarada kale oo dhan

...ilaa kalabadh dhallinyarada ajinebiga ahi ka helaan caawimada waxbarashada kafateeriyada casharrada

CARRUURTU WAX BAY KU BARTAAN GURIGANA

Carruurtu wax kuma bartaan dugsiga oo qudh ah. Gurigana wax bay ku bartaan maalin kasta.

Baadhitaannada ayaa muujinaya, inay carruurtu ku fiicnaadaan dugsiga, haddii waalidku xiisogeliyo oo taageero. Siyaabo badan ayaa loo samayn karaa arrintaas.

Dugsiyada deenishku waxay filaan, in waalidku la sameeyo iskaashi dugsiga iyo macallimiinta oo masuul ka noqdo, sida ilmuhu isugu filnaanayo. Taasi maaha keli ah inuu ka caawiyo casharrada deenishka. Waa inuu la hadlo oo wa kula akhriyo guriga, si ilmuhu u noqdo xariif. Hadday tahay deenish ama luqadda hooyoba.

Meliha Saglanmak ayaa tidhi: ”Macallin ahaan waxaan si cad u gartaa, in ilmuhu ka yimi guri, xoog wax loo akhriyo loona hadlo. Luqaddu ha noqoto ta ay doonto e. Ilmuhu wuxu bartaa, inuu cabbiro fikraddiisa, oo dhegaysto oo maamuuso dadka kalena.”

FILASHOOYINKA

Waalid badan ayaa raba, in carruurtoodu horumaraan oo guulaystaan, carruurtuna waxay rabaan, inay waalidkood u han waynaadaan. Waalidka qaarkood ayaa ka fisha, in ilmahoodu noqdo qof aan caadi ahayn. Taasi waxay culays wayn saartaa ilmaha. Qaadashada waxbarashadu waa hawl adag. Way sii adkaanaysaa, marka aanay qofka isaga ka soo goin. Nidaamka waxbarashada deenishkuna waa fursado miidhan.

HALGANKA WIILASHA

Walid wuxu qabaa, in kaalinta wiilasha ee qoysku mararka qaarkood ka hor joogsado jidka guusha waxbarashada iyo shaqada: ”wiilasha ayaa qoysaska qaarkood lagu qasbaa kaalin dhaqaale, iyo inuu masuul ka noqdo hablaha walaalihiis ah. Wiilasha qaarkood ayaan loo oggolaan, inay noqdaan carruur ama dhallinyaro.”

Meliha Saglanmak ayaa la kulantay wiilal badan oo dhallinyaro ah, oo aan qaadan waxbarashada. Sababtu waxay ahayd masuuliyadda gaarka ah ee la saaray iyo waxyaabaha qaldan ee laga filayo:

”Habluhu waa inay is muujiyaan. Waxay u halgamaan xorriyad, guul iyo sharaf. Wiilashu way haystaan xorriyaddaas. Sidaas awgeed xoog ugu ma dadaalaan dugsiga. Sidaas awgeed waxaan qabaa, in wiilasha iyo hablaha loola dhaqmo oo loo koriyo si isku mid ah. Haddii wiilasha loo oggolaado, inay yeelaan waxa ay la noqoto, markaas ku dadaali maayaan dugsiga.”

Wiilashu waxay u baahan yihiin, in qoysku ku taageero waxbarashada sida hablaha oo kale. Waalid ahaan waa inaad ka caawisaan, inay helaan jihada waxbarashada ay raacayaan, ee ay xamaasaddeeda hayaan, si ay ugu guulaystaan una hanwaynaadaan. Dabadeed la jaanqaadaan hablaha.

”WAXA AAD IIGU WAYNAA FALCELINTA, SIDA DADKA KALE WAX U ARKAAN.”

HOOYO KA WARRAMAYSA, SIDA FIKRADDA QOYSKEEDU U SAAMAYN GAADHAY XIDHIIDHKA AY LALEEDAHAY INANTEEDA.

”Aniga ayaa keliday barbaariyay hablahayga. Waxaan carruurta u barbaariyay sidaan is lahaa waa barbarin fiican, ee qoyskayga iyo saaxiibadayna u qabeen inay fiican tahay. Waayo waxaan ahaa hooyo kelideed ah, cid walibana isha ayay igun haysay – bal inaan ka adag ahay hablahayga? Maalin ayay inantaydu guriga timi oo ii sheegtay, inay is jecel yihiin nin Irani ah oo rabto inay guursato. Waan argagaxay oo is waydiiyay – waxa qoykayagu odhan doono? Waan ka mamnuucay inantaydii, inay guursato ninkaas. Laakiin xisaabtaydu waxay ku salaysnayd waxa dadku aqbalayaan iyo waxa aanay aqbalayn. Waxaan ka cabsi qabay falcelinta qoyskayaga. Waxaan qabay, inay fican tahay, in hablahaygu guursadaan rag carab ah, laakiin ta muhiimka ahi waxa weeye, inay faraxsan yihiin. Aad ayaan ula dagaallamay inantayda, xidhiidhkiise muu goin. Waan gartay, inay jeceshahay, laakiin waxaan hubay, in qoyskaygu aanay oggolaanayn guurkaas. Waxa aad iigu waynaa, sida dadka kale wax u arkayaan. Waxa aan dareemayay, inuu xumaaday xidhiidhkii aan la lahaa inantaydu, mana aan rabin inaan waayo. Maalin ayaan walaalahay u tegay oo la socodsiiyay dhibaatada i haysata. Inantayda ayaan caabbiyay, waayo waxaan qabay, inay diidayaan. Laakiin waxay ii muujiyeen, in aanay waxba ka qabin kol hadduu muslin yahay. Haddii aanan la hadli lahayn, waxaan qabay, in dhibaatadu bilaabmi lahayd, marka inantaydu guursato ninkaas. Dhab ahaan waxaan bartay, in qofku wadahadal la galo ee aanu samayn uun, waxa dadka kale qabaan.”

Khabiir:
Anoir Hassouni wuxu guddoomiye ka yahay xarunta Ressource Center Ydre Nørrebro ee Kobanheegan. Wuxu dhalay 3 carruur ah, wuxu ku dhashay Danmark asalkiisuna waa Marookaan. Anoir wuxu waayoaragnimo wayn u leeyahay, inuu si iskaa wax u qabso ah u abaabulo dhallinyarada xilliga firaaqada iyo nolosha ururrada.

URURRADA & XILLIGA FIRAAQADA

FIRFIRCOONIDA XILLIGA FIRAAQADU WAY CAAWISAA ILMAHAAGA
Inay firfircoonaadaan xilliga firaaqadu way u fiican tahay ilmahaaga maalintii iyo mustaqbalka labadaba. Waxay ka helayaan kalsooni iyo caafimaad. Waxay ka helayaan awood iyo xidhiidh ay isticmaalaan noloshooda danbe.

Anoir Hassouni ayaa yidhi: ”arrinta muhiimka ahi waa in carruurta dhallinyaradu firfircoonaadaan. Markay leeyihiin xilli firaaqe firfircoon, waxay yeelanayaan xidhiidh badi ka duwan halka ay deggan yihiin. Waxay horseedaysaa, inay hore u socdaan dugsiga iyo shaqada xilliga firaaqada labadaba ”.

Taasi waa arrin uu sidoo kale garanayo Walid El Jamal: ”marka carruurta iyo dhallinyaradu ay firfircoon yihiin, sidoo kale waa bulshaawiyiin. Waayo waxay la kulmayaan dhallinyaro kale, oo aan la mid ahayn. Waxay dareemayaan inay yihiin qayb ka mid ah bulshada, markay kula kulmayaan dhallinyarada kale tusaale ahaan, guriga xilliga firaaqada, ee halkaas kaga qaybqaadanayaan hawlgallada.”

OGAANSHAHA NOLOSHA URURRADA
Ma jiraan dalal kale oo badan, oo dhaqan ugu leh ururada sida Danmark. Sidaas awgeed waxa laga yaabaa, in waalidku ka shakiyo, waxa ka socda ururrada. Anoir Hassouni ayaa yidhi: ”waalid badan ayaa ka shakisan, laakiin markay yimaaddaan, wax wayn ayaa iska beddela. Markay arkaan hawlgallada aannu wadno,

Muxuu dhigayaa sharcigu?

Dhammaan xaq ayaa loo leeyahay, in xubin laga noqdo urur sharci ah

Qofku isaga ayaa goaansanaya, inuu xubin ka noqdo urur

Ma og tahay in…

… ay jiraan tiro ka badan 100.000 oo urur oo kala duwani Danmark, oo isugu jira naadiyada isboortiga, kafateeriyayaasha casharrada, kooxaha muusiga iyo ururrada dhaqanka

… carruurta firfircooni ku faraxsan yihiin dugsiyada iyo macallimiintooda xisadaha badidooda

… carruurta firfircooni ku fiican yihiin saaxiibbo samaysiga, xanuunkooduna yar yahay

… ka qaybqaadashada dhallinta ee hawlgallada ururradu u samayso xidhiidho iyo fursado shaqeed

… dad badani shaqadooda ka heleen xidhiidhkaas

… hablaha iyo dumarka ajinebiga ahi ka firfircooni yar yihiin xagga ururada dadka kale

waxa gasha kalsooni iyo faham ay u yeeshaan hawlgallada".

Had iyo jeer waydii macallimiinta ilmahaaga ama rugkutubeedka lookalka ah, haddaad rabto, inaad wax ka ogaato ururrada iyo naadiyada aagga aad deggan tahay.

KU DHAWAANSHAHA BULSHADA DEENISHKA

Nolosha ururrada iyo xilliga firaaqada ayay carruurta iyo dhallinyaradu kula kulmaan carruur kale, oo ka duwan iyaga. Waxay aragti ka siin karaan bulshada.

Anoir Hassouni ayaa ka warramay wiil dhallinyaro ah. Marku bilaabay ururka wuu u cadhaysnaa bulshada. Wuxu qabay aragtida "innaga oo ku lid ah iyaga". Anoir Hassouni ayaa sheekada sii waday:

"Xarunta Ressourcecenteret waxay dhallinyarada siisaa fursad ay ku ogaadaan waxay yihiin. Waxay noqdaan dad adag oo bulshada ka tirsan, waxay rumaystaan in wax fiican la qaban karo. Wuxu rumaystaa, in bulshadu soo dhawaynayso. Haddaad ka tirsan tahay urur mutawiciin ah, waxaad mutadawuc u tahay sida dadka kale. Waxba kuma jabna qofka aad tahay."

ÔMAR: AAD AYAAN UGU DARSADAY HOOYADAY, XOOGNA WAAN U JECLAHAY, LAAKIIN KUMA NOOLAAN KARO WAXA MASKAXDEEDA KU JIRA

Ômar wuxu weligii xidhiidh dhow la lahaa qoyskooda kurdida ah. "Waxa aan ku soo barbaaray qoys dhaqanka xejiya, markastana waxaan ku noolaa xeerarka qoyska," Ômar wuxu caashaqay gabadh aan kurdiyad ahayn: "Waan ogaa, in aanay arrintaas waxba ka suurtagelayn. Kalgacalka aan u hayo waalidkay dartii, waxaan qabay, inay sida saxa ahi tahay, inaan inaadeertay ka soo guursado Turkiga. Fursado kale u maan arkayn mustaqbalkayga." Laakiin farxad kuma mudan guurkaygii Danmark: "Halgan wayn ayaan u galay, inaan farxad ka helo guurkayga cusub. Laakiin fikradda ay xaaskaygu ka qabtay guurka aad ayay uga duwanayd tayda. Aad ayay ugu adkayd, inay aqbasho nolosha madaxabannaan ee Danmark. Waxa abuurmay iska horimaad wayn." Ômar wuxu u halgamay, inuu badbaadiyo reerkiisa. "Waxaan halganka u galay si aan u ilaaliyo sharafta qoyskayaga. Ma rabin, inaan weji gabax kala kulmo." Ômar kala ma hadli karayn qofna dhibaatadiisa, laakiin wuxu samaystay xusuusqor. "Waan qori jiray farxad la'aantayda iyo dhibaatada aan ku jiro. Maalin ayay xaaskaygii miiska ii saartay kaatunkii meherka, oo xaashi iigu qortay, inay ku laabatay dalka Turkiga, si aan nolol madaxbannaan ugu noolaado." Waxay akhriday xusuusqorkaygii: "Cid kastaa waxay filaysaa, inaan soo ladqabeeyo. Hooyaday ayaa Turkiga i gaysay, oo igu cadaadisay si aan u soo raalligeliyo xaaskayga, laakiin taas awood u maan lahayn." Arrintii waxay ku dhammaatay, in qoysku dayriyaan, oo Ômar kelidii joogo Ankara. Marku ku soo laabtay Danmark way xumaatay xaaladdiisii: "Waan is go'doomiyay. Aqalka ayaa hoosta ka xidhdhay, oo daahyada sii daayay. Cidina ima waydiin sida xaalkaygu yahay. Tan iyo markaas marar yar ayaan la hadli jiray hooyaday. Waxay igu gooddiyi jirtay, inaan iyadana sidoo kale waayayo, haddii aanan ku noqon xaaskayga." Maanta waxay Ômar wada hadlaan uun aabbihii, oo fahansan doorashadiisa. Laakiin hooyadii ma hayo, wuu u darsaday: "Waan jaclahay, laakiin isma fahamno."

FURSADAHAAGA AAD KU HELAYSO CAAWIMO

Had iyo goor waa suurtagal, in laguu caawiyo qaab talabixin ama ergayn ah, haddii aad dhibaato kala kulanto qoyskaaga. Deeqaha hoos ku xusani waa lacag la'aan, lataliyayaashana waxa ku waajib ah xilqarin. Sidoo kale 100% ayaa la qarinayaan qofka aad tahay.

TILIFOONKA WAALIDKA EE URURKA BØRNS VILKÅR:
Isniin-Khamiid12-21saac iyo jimcha 12-19 saac, tilifoonka 35 55 55 57.

Tilifoonka waalidku waa deeq talobixineed oo qarsoodi ah oo loogu talogalay waalidka iyo ehelkooda raba, in laga la taliyo kooxaha kala da'da ah ee carruurta iyo dhallinyarada.

www.bornsvilkar.dk

TILIFOONKA WAALIDKA – LOKK
Xilliyadu furan yahay: Maalmaha shaqada 9.00-15.00 saac, Arbacada 20.00-22.00 saac, tilifoonka 70 27 03 66

www.lokk.dk/Rådgivning/Forældretelefonen/

Carruurta asalkoodu yahay doolka ama qaxootigu waxay dhibaato kala kulmi karaan labada dhaqan. Waxa kaloo ay dibaato dheeraad ahi dhex mari kartaa iyaga iyo waalidka. Sidaas LOKK ayaa samaysay talabixin tilifoon oo qarsoodi ah, oo loogu talogalay waalika asalkoodu yahay qaxootiga iyo doolka. Talada waxa lagu bixiyaa af deenish, laakiin waxa suurtagal, in tilifoonka laguugu tarjumo. Sidoo kale waxa suurtagal ah, in ergo laga noqodo iska horimaadka dhallinyarada iyo waalidka.

GARO XUQUUQDAADA:
Finfo.dk waxay ku siinaysaa warar la xidhiidha xuquuqdaada, waajibaadkaaga iyo fursadaha aad ku leedahay bulshada deenishka, oo ku qoran 8 luqadood.

www.finfo.dk

NOLOSHAADA. FURSADAHAAGA

ALS RESEARCH

MINISTERIET FOR FLYGTNINGE
INDVANDRERE OG INTEGRATION

Qalabkani wuxu qayb ka yahay ololaha Noloshaada (Dit Liv). Fursadahaaga (Dine muligheder), oo Als Research ay u diyaarisay wasaaradda qaxootiga, doolka iyo qalabixinta.